# County of San Diego

DEPARTMENT OF ENVIRONMENTAL HEALTH AND QUALITY

P.O. BOX 129261, SAN DIEGO, CA 92112-9261

Lambarka Taleefanka: (858) 505-6900 | Fakiska : (858) 999-8920 | www.sdcdehq.org


## LIISKA SHURUUDAH IIBKA CUNTOOYINKA GURIGA LAGU SAMEEYO (MEHKO)

Alaabta hoos ku taxan waxay ay muujinaya meelaha ugu muhiimsan ee la qiimeeyay inta lagu jiro kormeerka joogtada ah ee MEHKO. Liiskan hubinta waxa loo qaabeeyey inuu adiga ku caawiyo, hawl wadeenka xarunta, wax ku aadan qiimaynta xaalada hawlgalkaaga inta u dhaxaysa kormeerka waaxdan. Waxaan kuu soo jeedinaynaa inaad si fiican u eegto liiskan, oo aad "calaamadayso" waxyaabaha aad aaminsan tahay inay waafaqsan yihiin. Waxa kuwa aan la calaamadayn loo aqoonsan doona inay yihiin "xadgudub" waana in la saxo. Fadlan wac Takhasuslahayaga Shaqada ku jira oo ka wac lambarka (858) 505-6900 ama iimayl u dir FHDMEHKO@sdcounty.ca.gov haddii aad wax su'aalo ah qabtid.

### BADQABKA CUNTADA

- ☐ Waa in cuntooyinka loo soo iibiyay ganacsigaaga si sax ah ayaa loo calaamadeeyo oo laga soo iibsadaa meel la oggolaaday (oo ay shati siisay maamulka degmada, gobolka, ama dawladda dhexe).
- ☐ Dhammaan cuntooyinka waxa lagu kaydiyaa ugu yaraan 6" fiit wax ka hooseeyo.
- ☐ Waa in cunto kasta oo lagu kaydiyo meel ka baxsan guriga (sida garaashka, hooska, barxadda) si habboon loogu kaydiyaa qaboojiyaha oo leh albaab/dabool si haboon u xidhan.
- ☐ Cuntooyinka cayriinka ah oo dhan waa la dhaqaa ka hor inta aan la jarin, la bixin, iyo/ama lagu darin waxyaabaha kale ka hor inta aan la karinin.
- ☐ Cuntadu waa in laga ilaaliya wasakhda, maaraynta aan loo baahnayn, daadashada, iyo noocyada kale ee wasakhaynta.
- ☐ Waa in dhammaan weelasha kaydinta cuntada ay leeyihiin daboolo habboon oo si habboon loogu calaamadeeyay magaca waxa ku jira.
- ☐ Waa in Aaabooyinka cuntada lagu kaydiyaa weel aan sun ahayn.
- ☐ Waa in waxyaabaha khatarta ah (qalabka nadiifinta) si habboon loo calaamadeeyo oo lagu kaydiyaa meel ka fog alaabta cuntada.

### XAKAMAYNTA HEERKULKA

- ☐ Waxaa cuntooyinka khatarta ah lagu keydiyaa 41°F ama wax ka hooseeya.
- ☐ Heerkul-beeg, oo sax ah + ama -2°F, ayaa la bixiyaa mid kamid ah qaboojiyaha (diwadd lagu sameeyay) ama waxa uu ku yaalaa gudaha unug kasta, meesha ugu diiran, meel diyaar ah oo la arki karo.
- ☐ Heerkulbeeg sax ah oo bir ah ama heerkulbeeye, oo ku habboon cabirida heerkulka cuntada, ayaa diyaar ah waxaana loo istcmaalay in lagu hubiyo heerkulka cuntada.

### QALABKA/ MAACUUNTA

- ☐ Waa in dhamaan alaabta (sida, maacuunta, miisaska, saxanka, weelasha cuntada, iwm.) waa nadiif oo si wanaagsan ayaa loo dayactiray, oo meelaha cuntada si fiican loo dhaqo, loo nadiifiyey, oo loo engejiyey.
- ☐ Biyo raacida ugu dambeysa ee qalabka waxaa kaliya lagu sameeyaa mid ka mid ah siyaabahan soo socda: a) gelinta millanka 100 ppm koloriin ugu yaraan 30 ilbiriqsi; b) gelinta milnka 200 ppm quaternary ammonium ilaa 60 ilbiriqsi; c) gelinta mishiinka saxanka dhaqda oo awood u leh in uu gaadho heerkulka dusha maacuunta ee 160°F.
- ☐ Qalabka baaritaanka oo si saxan loogu tijaabiyo hababka nadaafadda ayaa diyaar ah oo la isticmaalo Waa in qalabka baaritanka ay la socdaan nooca sanitizer-ka ee la isticmaalo.
- ☐ Waa in maaacuunta jabay ama aan la ansixin ayaa si habboon loo dayactiro ama loo beddelo.
- ☐ Waa in maacuunta si sax ah looga ilaaliyaa wasakhda inta lagu jiro kaydinta.
- ☐ Waa in maryo qalalan iyo kuwa qoyan labadabo ayaa si habboon loo isticmaalaa. Marada tirtirka ee inta badan la isticmaalo ayaa waxaa lagu kaydiyaa sanitizer milanka (100 ppm kolorin ama 200 ppm quaternary ammonium) marka aan la isticmaalin.

## CAAFIMAADKA iyo NADAAFADA SHAQAALAHA

- ☐ Waxa Mulkiilaha/ hawl-wadeenka MEHKO uu helay Shahaadada Maamulaha Badqabka Cuntada (oo la cusboonaysiiyo shantii sanaba mar) iyo dhammaan shaqaalaha kale ee gacanta ku haya cuntada ama maacuunta aan baakooyinka lahayni waxa ay heleen Shahaadada Maaraynta Cuntada (oo la cusboonaysiiyo saddexdii sanoba mar), oo dhammaan diiwaannada ayaa ah oo la heli karaa.
- ☐ Shaqaaluhu waxay gacmahooda ku dhaqaa saabuun iyo biyo diiran sababo la xidhiihda mid ka mid ah kuwan soo socda: a) ka hor intaysan bilaabin shaqada; b) isla markiiba ka dib markaad isticmaasho musqusha; c) hawlaha dhexdooda; d) wakhti kasta oo loo baahdo si looga hortago wasakhowga cuntada.
- ☐ Waa in shaqaalaha gacanta ku haya cuntada ama maacuunta aysan lahayn nabaro muuqdo, oo aysan lahayn astaamaha shubanka, mataga, qandhada, ama qufac joogto ah, hindhiso, ama diif.
- ☐ Waa in shaqaaluhu ay xidhanadaan dhar nadiif ah, timaha shaqaalahana si sax ah ayaa loogu daboolnaadan, daboolka timaha, ama bacda timaha.
- ☐ Shaqaaluhu kuma cabbi karaan sigaarka mana ku isticmaalaan tubaakada gudaha jikada guriga. Haddii aan la qaadin tillaabooyinka lagaga hortagayo waskhaynta cuntada iyo meelaha cuntadu la saaro, carruurta waa laga saarayaa goobaha diyaarinta cuntada inta lagu jiro diyaarinta alaabta liiska cuntada ee MEHKO. Ma jiraan hawlo cunto karinta oo shakhsi ahaneed oo la sameynayo inta lagu jiro samaynta cuntada MEHKO.
- ☐ Dharka iyo waxyaabaha shakhsi ahaaneed ayaa loo kaydiyaa si habboon.

## BIYAHA IYO BALACADAHA

- ☐ Dhammaan sinkiyada si buuxda ayey ugu shaqeeyaan biyo kulul iyo qabow oo cadaadis dara leh. Biyaha gacmaha lagu dhaqo waa inay ahaadaan ugu yaraan 100°F, waa in biyaha kululna ugu yaraan 120°F laga helaa guriga dhexdiisa.
- ☐ Tuubooyinka ayaa xaalad wanaagsan ku sugan oo mana daadanayaan.
- ☐ Dhammaan biyaha wasakhda ah si sax ah ayaa loogu daadiyaa iyada oo loo marayo hab la oggolaaday ee wasakhda qashinka bulaacadaha (tusaale, bullaacadaha, nidaamka septic-ka).

## SAGXADAHA / DARBIYADA / SAQAFYADA

- ☐ Sgaxadaha waa nadiif, si wanaagsan ayaa loo dayactiray, oo dayactir wanaagsan ayay ku suganyihiin.
- ☐ Darbiyada, saqafka, iyo dariishadaha waa nadiif, si wanaagsan ayaa loo dayactiray oo dayactir wanaagsan ayay ku suganyihiin.

## MUSQUSHA/GOOBAHA GACMAHA LAGU DHAQDO

- ☐ Xaruumaha musqulaha ayaa nadiif ah, si wanaagsan loo dayactiray oo dayactir wanaagsan ayay ku suganyihiin.
- ☐ Tuwaalooyin waraaqo ah ee halka mar la isticmaalo iyo saabuunta halka mar la isticmaalo ayaa jira (saabuunta dhaadheer iyo tuwaalo ah maryo dib loo isticmaali karo lama ogola).
- ☐ Qalabka lagu rido tiishka musqulaha ayaa buuxa.
- ☐ Hawo fiican ayuu leeyahay qol kasta oo nasasho ah oo waxay ku suganyihiin xaalad wanaagsan.

## XAKAMAYNTA CAYAANKA

- ☐ Xaruntu ma lahan wax cayayaanka iyo jiirka ah.
- ☐ Xoolaha nool looma oggola meelaha cuntada lagu diyaariyo waana in laga reebo goobaha diyaarinta inta lagu jiro diyaarinta alaabta liiska cunnada MEHKO.
- ☐ Kaliya sunta cayayaanka ee la ansixiyay ayaa loo isticmaalaa habka saxda ah sida ku cad calaamadda soo saaraha suntaas cayayaanka.

## QASHINKA

- ☐ Weelasha qashinku waa kuwo aan dareer iyo daadasho lahayn oo daboolan.
- ☐ Bacaha balaastikada ah waa la xidhaa ka hor inta aan la gelin weelasha qashinka.
- ☐ Weelasha qashinka ee dibadda ayaa xaalad wanaagsan ku sugan, daboolkuna waa la xiray.

## HAWLGALKA

- ☐ Xaruntu waxay leedahay ogolaanshaha Waaxda Caafimaadka Deegaanka iyo Tayada ee hadda si ay u shaqeyso mar kasta.
- ☐ Koobi ka mid ah warbixintii kormeerkii u dambeeyay ayaa diyaar u ah in dib loo eego haddii la codsado.